



Dugsiyada dhexe: Warbixinta horumarka laga sameeyey Dugsiyada Dhexe

Dugsiyada degmadu waxa ay furayaan labada dugsi dhexe ee cusub Roseway Heights iyo Harriet Tubman oo qeyb ka ah dadaalada la rabo in bulshadeen la siiyo waxbarasho dheeraad ah oo loo siman yahay dugsiyada dhexe. Hawshani waa hawl culeyskeeda iyo baaxadeeda leh iyada oo ay la xiriirto tiro iskuulada Dugsiyada Dadweynaha Portland ah, barnaamijyada iyo waaxyaha. Fiiri qaar ka mid ah horumarka la xiriira mashruucyada:

Dugsiga Rose City Park

Jeremy Cohen oo ah maamulaha iskuulku wuxuu soo dhaweeeyey in ka badan 100 waalidiin ah iyo arday munaasabada casuumada Pizza ee loo qabtay Maamulahaaga Cusub maalintii Isnintii, Abriil 9keedii Dugsiga Rose City Park. Habeenkasi wuxuu ahaa fursad ay waalidiintu ay wax badan ka baranayeen maamulaha cusub iyo in ay arkaan iskuulka ay caruurtoodu wax ka baran doonaa sanad-dugsyeedka soo socda ee 2018-2019, marka uu noqdo dugsi hoose.

Dugsiga Dhexe ee Roseway Heights

Waxaa munaasabada ay ardaydu horkacayaan oo lagu daawanayo iskuulkani Roseway Heights ka soo qeybgalay in badan 225 qof bishii Maarso. Dadka ka soo qeybgalay waxa ay ahaayeen waalidinta ardeydoodu wax ka barato iskuulada Scott, Lee, Vestal iyo Roseway Heights K-8, sidoo kale waalidiin kooban oo ardaydoodu wax ka baran doonaan mustaqbalka Roseway Heights.

Kulanka labaad ee bulshada waxa la qaban doonaa maalinta Arbacada, Abriil 18keeda iyada oo lagu qaban doono Roseway Heights saacadaha u dhaxeeya 6:30 habeenkii ilaa 8:30 habeenimo. Waxaa ka soo qeybgalayaasha u diyaar ah cunto fudud , sidoo kalena turjubaano luqdaha Isbaanishka, Fiitnaamiska iyo luqada Soomaaliga, iyo daryeelayaal kuu xannaaneeya caruurta inta uu shirku socdo carurta da'doodu tahay 4 sanno iyo wixii ka weyn.

Dugsiga Dhexe ee Harriet Tubman

Wali way socotaa shaqadii laga hayey dhismaha ee loogu diyaargaroobayey sidii loo furi lahaa xilliga dayrta. Xayndaadbikii darbiga iskuulku waa lagu wareejiyey, iyo iyada oo ay socota shaqadii lagu bedelayey saqafka.Jaamacadda Gobolka Portland waa ay dhammeystireen tijaabooyinkii ay ku hubinayeen tay'ada hawada.

Wixii warar ee cusub waxaa lagu soo bandhigi doonaa [bogga dugsiga dhexe](#) ee shabakada dugsiyada degmada.

Waxyaabaha ka soo cusboonaaday Iskuulka Pioneer

Kor-u-kaca kharashka iyo iyada oo ay suurtagal noqon wayday inay maamulaha magaalda Portland siiyaan oggolaansho wawa uu sababay in dugsiyada degmadu go'aansatdaan inay joojiyaan guuritaankii iskuulka Pioneer ay u guurayeen Applegate iyo Iskuulka Rice. Ardayda wax ka barataa Pioneer wawa ay sii joogi doonaa iskuulkooda sanad-dugsiyedka 2018-19.

ACCESS Academy

Waalidiinta ACCESS/macalimiinta/Hoggaanka Kooxda Tallo-bixinta oo ujeeddadda loo aasaasay tahay sidii ay kooxda hoggaanka dugsiyada degmada ugala talin lahaayeen raadinta goobtii barnaamijka ee waqtiga dhow iyo waqtiga dheerba.

Kooxda tallo-bixintu wawa ay ka hadli doonaan arrimo kala gedisan oo la khuseeya sidii loo gaari lahaa go'aan kama dambeys ah, oo ay ka mid yihiin: awooda dhismaha, xudduudaha, baahida shaqaalaha iyo barnaamijka, iyo shuruudaha meelmarinta sidii loo guuleysan lahaa. Kooxdoo wawa ay Guddoomiyaha Waxbarashada siin doonaan tallo soo jeedintooda iyaga oo isticmaalaya aqoontooda.